# Barnaamijka Difaaca Sharciga Muhaajiriinta Ismaamulka San Diego (ILDP)

## KU SAABSAN ILDP

Barnaamijka Difaaca Sharciga Muhaajiriinta Ismaamulka San Diego (ILDP) waxa asaasay 2021 Kormeere Terra Lawson-Remer iyo Kormeerayaasha Guddiga Ismaamulka San Diego. Barnaamijka hal-abuurka ah wuxuu siinayaa matalaad sharci muhaajiriinta xidhan ee waajahaya masaafurin, isagoo hubinaya nidaam cadaalad iyo sinaan oo dacwadaha muhaajiriinta ah. Waxa bilaabay Abril 2022 Xafiiska Golaha Loo-Xilsaaray (OAC) ee Xafiiska Difaaca Dadweynaha, ILDP wuxuu ku shaqeeyaa qaab aan la fiirinayn aqoonta.

Madaamoo gobol xuduud ah aan nahay, waxaanu nahay ubucda nidaamka muhaajiriinta qaranka. Nidaamka maxkamada muhaajiriintu wuu gaabiyaa, waa dhinac kaliya, waxaana ka buuxa qaladaad iyo tayo xumo. Taasi waa sababta Guddiga Kormeerayaashu u asaaseen Barnaamijka Difaaca Sharci ee Muhaajirka – si loo hubiyo inaan difaacno xuquuqda dastuuriga ah ee nidaamka dacwada oo aan u dadejino nidaamkeena cadaaladna uga dhigno. Laga bilaabo ilaa iyo markii aan ka helnay 17 wicitaan maalintii dadka ku xidhan Ismaamulka San Diego ee waajahaya nidaamka muhaajiriinta una baahan caawimo.

## SAAMYNTA BARNAAMIJKA

**2,500** shakhsiyaadka la matalay ilaa 2022

**7,275** wicitaan oo laga helay dadka raadinaya matalaad, celcelis ahaan **17** wicitaan maalintii

Heerarka matalaada macaamiisha ku xidhan Otay Mesa oo ku dhawaad saddex laabmay, laga bilaabo **10%** ilaa **28%**

**66%** kiisaska natiijooyinka balaadhan ee ka dhashay guul ama kujira dalka.

## TUSAALEYAASHA KIISKA

- Nin dhaqan xun oo kasoo qaxay El Salvador kadib markii ay waxyeeleyeen gaangis oo ay beegsadeen kadib siyaasada dawlada ee "Gobolada Kareeban", taasoo ku xidhaysa dadka la leh xidhiidh gaangis. Waxa garaacay booliiska oo si joogto ah ugu kufsaday xabsiga. Kadib markuu usoo qaxay Mareykanka, ILDP waxay ku guulaystay siidayntiisa, oo hadda wuxuu si badqabta ugula nool yahay qoyskiisa Maryland.

- Qaxoonti Kuba kayimid ayaa loo jidh-dil inuu diiday dawlada wuxuuna sii waday ololihiisa onlaayn kadib markuu yimid Mareykanka, taasoo keentay in lagu beegsado shuruucda boro-bogaandada ee Kuba ee cusub. Garsoore ayaa siiyey ilaalin hoos timaad Dastuurka Ladagaalanka Jidh-dilka. Inkastoo Waaxda Amniga Qaranku rafcaan ka qaadatay, waxa lagusii daayey caawimada ILDP oo wuxuu imika kula nool yahay hoy Texas ah isagoo sugaya fasax shaqo.

---

## SHAHAADOOYINKA

a. Barnaamijkani laguma xadidaayo muhaajiriinta xidhan ama kuwa hadda kujira xaalad Xabsi oo Kale oo Ismaamulka San Diego ah.

---

## FARRIINTA KORMEERE TERRA LAWSON-REMER

Afar sano kahor, waxaanu bilownay Barnaamijka Difaaca Sharciga Muhaajirka Ismaamulka San Diego annagoo leg aragti fog: inaan hubino in aan qof katirsan bulshadeenu waajihin dhibaato masaafurin kaliya sababtoo ah ma awoodo qareen.

Maanta, waxaanu ku faanayaa inaan idinla wadaago in barnaamijkani siiyey matalaad sharci oo muhiima inkabadan 2, 500 oo qof, isagoo u taagan cadaalad, nidaam fiican, iyo sharafta binaadamka. Way ku mahadsan yihiin shuraakadeena sharci ee dadaalaysa iyo caawimada bulshadeenu, waxaanu sameynaynaa isbaddel dhaba–annagoo isku haynayna qoysaska oo hubinayna in muhaajiriinta xaafadeheenu helaan fursad dagaal ay ku joogaan goobta ay ugu yeedhaan guri.

Barnaamikani wuu kabadan yahay kaliya matalaad sharci– waa cadaalad, sinaan, iyo nidaam fiican. Madaamoo aynu ka turjumayno saameynta barnaamijkan, waxaan aad ugu faraxsanahay waxa aynu ku guulaysanay iyo oo xataa waxa naga go'an inaan balaadhino shaqadan muhiimka ah sanadada soo socda.

**- Terra Lawson-Remer**
Guddiga Kormeerayaasha Ismaamulka San Diego

**Wixii Macluumaad Dheeraad ah: Taleefanka : (619) 446-2883**
**Iimaylka: oac@sdcounty.ca.gov**
**Saacadaha: Isniin - Jimce I 8:00 AM - 5:00 PM**
**Otay Mesa Khadka Bilaashka ee Xabsiga: 1157#**